

Xuquuqdayda daryeelka caafimaadka

Tani waa qaybta labaad oo **Axdiga Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka (Australian Charter of Healthcare Rights)**.

Xuquuqahani waxay khuseeyaan dhammaan dadka goob kasta halkaas oo daryeel caafimaad lagu bixiyo.

Axdigu wuxuu qeexaa waxaad adiga, ama qof aad daryeeshaa, filan karo markuu helayo daryeel caafimaad.

Waxaan xaq u leeyahay:

Helitaan

- Adeegyada daryeelka caafimaadka iyo daaweynta wax ka qabanaysa baahidayda

Amaanka

- In helo badqab iyo tayo caafimaad oo aad u sarraysa taas oo buuxisa mustawayaasha qaranka
- In la igu daryeelo bay'ad iga dhiga in aan dareemo amaan

Ixtiraam

- In laguula dhaqmo shakhsi ahaan, iyo qadarin iyo ixtiraam
- In aan leeyahay dhaqankayga, aqoonsigayga, aaminaadayda iyo waxaan rabo oo la ixtiraamo lana aqoonsado

Qayb ka qaadasho

- Weydiyo su'aallo lugna ku yeesho si furan iyo wada xiriir daacad ah.
- Sameeyo go'aamo la xiriira bixinta daryeelkayga caafimaad, ilaa xadka in aan dooran karo aana awoodo
- Ka darista dadka aan u doonayo qorshaynta iyo go'aan samaynta

Macluumaad

- Macluumaad waadax ah oo ku saabsan xaalladayda, khataraha iyo faa'iidooyinka iman kara baadhitaanada kala duwan iyo daaweynta, si aan u bixiyo ogolaanshahayga ka warqabka ku salaysan.
- Helida macluumaad ku saabsan adeegyada, sugitaanka waqtiyadan iyo qiimaha
- In la siiyo kaalmo, markaan u baahnahay, si ay ii caawinto aana u fahmo una isticmaalo macluumaadka caafimaadka.
- Helitaanka macluumaadka caafimaadkayga
- In la sheego haddii wax qaldameen intii lagu jiray mudadii daryeelka caafimaadka, siday u dhacday, siday ii saamanayso iyo wixii laga qabtay si looga dhigo daryeelka amaan

Barayfasi

- In la ixtiraamo macluumaadkayga gaarka ah
- In aan helo macluumaad ku saabsan anniga iyo caafimaadkayga in laga dhigo ama iyo qarsoodi

Bixinta warcelin

- Bixinta warcelinta ama ka samay dacwad iyada oo aan waxyeellayn sida la iila dhaqmay
- In walaacayga wax la qabto si furan kuna haboon waqtiga
- La wadaago waaya-aragnimadayda iyo ka qaybgelida wanaajinta tayada daryeelka iyo adeegyada caafimaadka

